# Barayaasha U-doodeyaal ahaan: U-doodidda iyo La Shaqaynta Qoysaska Luuqadaha Badan Ku Hadla

U-doodidda iyo la shaqaynta qoysaska ardayda luuqadaha badan ku hadla waxay ka dhigan tahay garawsashada iyo qirista xaqa ay u leeyihiin in la wargeliyo, laga qaybgeliyo, loona ixtiraamo sidii shuraako siman oo ku aaddan waxbarashada carruurtooda. Isagoo ka duulaya codadka iyo waayo-aragnimada qoysaska, kheyraadkani wuxuu siinayaa barayaasha mowduucyo iyo su'aalo tusaale ah oo ay weydiiyaan qoysaska. Barayaashu waxay isticmaali karaan kheyraadkani marka ay wada-hadal laba geesood ah la yeelanayaan qoysaska ardayda luuqadaha badan ku hadla oo ay raadinayaan siyaabo ay si wadajir ah ugu doodi karaan.

## Kobcinta Wada-xiriirka laba geesoodka ah, Helitaanka Luuqadda iyo Ka-qaybqaadashada

Wada-xiriir cad, joogto ah, laba geesood ah, oo la heli karo iyo ka-qaybqaadashada u dhaxaysa qoysaska iyo barayaasha ayaa muhiim u ah u-doodidda guusha ardayga.

### Wada-xiriirka Laba-geesoodka ah iyo Helitaanka Luuqadda

1. Luuqaddee ayaad doorbideysaa inaad ku hesho farriimaha iskuulka, sideense u hubin karnaa inaad si cad oo joogto ah u hesho macluumaadka? Sideed u doorbideysaa inaad nala soo xiriirto?
2. Intee jeer ayaad jeceshahay inaad hesho warbixinnada ku saabsan horumarka ilmahaaga, iyo qaababkee isgaarsiineed (tusaale, fariin qoraal, iimayl, taleefan) ayaa kuu fiican?

### Ka-qaybqaadashada

1. Sideen si wax ku ool ah isugula shaqayn karnaa si aan u taageerno guusha ilmahaaga iyo aan u xoojino bulshadeena iskuulka?
2. Waa maxay siyaabaha aad doorbidayso inaad ugala qaybqaadato iskuulka, ula wadaagto ra'yigaaga, ama ula xiriirto qoysaska kale?
3. Ma qabtaa wax su'aalo ah oo ku saabsan sida ay wax uga shaqeeyaan iskuulka?
4. Ma jiraan go'aanno gaar ah oo ku saabsan waxbarashada iyo ladnaanta ilmahaaga oo aad jeclaan lahayd inaad qayb ka noqoto?

## Taageeridda Waxbarashada, Horumarkaka Tacliimeed iyo Ladnaanta Daryeelka leh ee Ardayga

Qoysasku waxay xaq u leeyihiin inay fahmaan sida carruurtooda loogu taageerayo iskuulka, fasalka dhexdiisa iyo dibaddiisaba.

WIDA
UNIVERSITY OF WISCONSIN–MADISON
wida.wisc.edu
WIDA is housed within the School of Education at the University of Wisconsin-Madison.
© 2025 Board of Regents of the University of Wisconsin System, on behalf of WIDA

## Taageeradaiyo Fursadaha Tacliinta

1. Waa maxay rajadaada iyo yoolalkaaga ku aaddan waxbarashada ilmahaaga sannadkan, sideense u wada shaqayn karnaa si aan u taageerno horumariisa tacliimeed? Sideen gacan uga geysan karaa kobcinta luuqadaha badan, xiisahaa, iyo hiddo dhaqameedka ilmahaaga?
2. Ma jiraan maaddooyin tacliimeed oo gaar ah oo aad dareemayso in ilmahaagu uga baahan karo taageero dheeraad ah ama fursado horumar, sideense u wada shaqayn karnaa si aan wax uga qabanno arrimahan?

## Ladnaanta iyo Adeegyada Taageerada

1. Sidee buu ilmahaagu u arkaa inuu iskuulka imaado? Ma jiraan wax ay tahay inaan ogaado si aan iskaashi uga yeelano kobcinta ladnaantiisa?
2. Ma jiraan waxqabadyo ama adeegyo (tusaale, manhajka ka baxsan, waxbarida gaarka ah, caafimaadka dhimirka, iwm.) oo aad jeclaan lahayd inaad wax badan ka ogaato?
3. Ma qabtaa wax su'aalo ah ama ma jiraan wax kale oo aad jeclaan lahayd inaad nala wadaagto?

Ma jiraan su'aalo kale oo aad weydiin lahayd qoysaska? Meesha hoose u isticmaal si aad ugu qorto wixii su'aalo dheeraad ah ee maskaxdaada ku soo dhaca.



© 2025 Board of Regents of the University of Wisconsin System, on behalf of WIDA